

# La hadal

Macluumaad iyo talooyin loogu talagalay dadka waaweyn, oo ku saabsan nabadgelyada carruurta ee dhanka internetka iyo nolosha caadiga ah.

# Door muhiim ah ayaad ku leedahay nabadgelyada carruurta



Adiga oo ah waalid ama qof kale oo weyn oo muhiim ah, inaad danayso xaaladda carruurta ee dhanka internetka iyo nolosha caadiga ah waxay door weyn ka qaadataa nabadgelyadooda. Balse had iyo jeer ma aha wax sahlan in la ogaado qaabka looga hadlo mowduucyada adag, iyadoo aan lagu xadgudbin xurmada shakhsiyeed ee ilmaha.

Galkaan waxaad ka helaysaa talooyin iyo tusaalooyin ku saabsan sida aad qof weyn ahaan carruurta ugala hadli karto xadgudubyada galmada – dhanka internetka iyo nolosha caadiga ah.

# Nolosha carruurta ee internetka

Qayb weyn oo ka mid ah nolosha carruurta iyo dhallinyaradu waxay ku dhex martaa internetka – oo ah goob loogu talogalay horumar, dhiirrigelin iyo midnimo. Xadka u dhexeeya nolosha caadiga ah iyo tan internetka waa mid aad u yar. Xataa shukaansiga, jacaylka iyo galmada waa qaybo dabiici ah oo ka mid ah nolol-maalmeedka dhallinyarada ee internetka. Sidaas darteed, nabadgelyada internetku waa inay noqotaa mid la mid ah nabadgelyada nolosha caadiga ah, dadka waaweynina waa inay ka hadlaan khataraha iyo fursadaha labadaba.

**Waa ayo qofka xadgudubka gaysta – oo xaggee ayay khataruhu ku gabbanayaan?**
Marar badan ayaa Ecpat la weydiiyaa cidda xadgudubyada carruurta u geysata iyo apps-ka ay tahay in laga fogaado. Jawaabtu waxay tahay inuu noqon karo qof kasta – dad waaweyn iyo carruur kale labadaba – xadgudbuhuna uu joogo meel kasta oo ay carruurtu joogto. Sidaas darteed, ayay muhiim u tahay in dadka waaweyni ay si isku mid ah u daneeyaan nolosha carruurta ee caadiga ah iyo tan internetka, ayna gaarsiiyaan aqoonta ku saabsan sharciyada iyo xeerarka ka jira.



# Sidan ayaad wadahadalka ku bilaabi kartaa

Waxaa muhiim ah in xiise loo muujiyo nolosha carruurta ee internetka, loona niyad-furnaado waxa ay sheegaan – ama xataa waxa ay doorbidaan inayna sheegin. Ilmaha weydii sida ay ahayd maalintiisa internetka, si la mid ah sida aad u weydiiso xaaladdiisa dugsiga. Ecpat Vuxenstöd (Taageerada Dadka Waaweyn) waxaad ka helaysaa jaheeyayaal wadahadal oo ay ku yaallaan talooyin ku saabsan sida aad carruurta yaryar iyo kuwa waaweyn ugala hadli karto mawduucyo ay ka mid yihiin jirka, xudduudaha, oggolaanshaha, galmada iyo xiriirrada. Si cad ugu sheeg inaad diyaar u tahay inaad dhegeysato—sida ay iyagu u doonayaan, adigoon cambaarayn.

**ecpat.se/vuxenstod/samtalsguider/**

# Maxay carruurtu u diraan sawirro qaawan?

Shukaansiga, jacaylka iyo galmadu waa qayb dabiici ah oo ka mid ah nolosha carruurta iyo dhallinyarada – xataa tan internetka. In la isu diro sawirro qaawan inta badan waa qayb ka mid ah tijaabinta nolosha, mana aha inay khatar horseeddo haddii xiriirku yahay mid labo-geesood ah oo ku dhisan ixtiraam.



Isla markaana, carruur iyo dhallinyaro badan ayaa sheegaya inay ka maqan tahay aqoon ku saabsan waxa habboon iyo waxa aan habboonayn. Taasi waxay keentaa inay mararka qaarkood ogaal u lahayn marka iyaga dambi laga galayo – ama marka ay iyagu halis ugu jiraan inay dambi galaan. Sidaa darteed, waa muhiim in dadka waaweyni ay carruurta kala hadlaan macnaha oggolaanshaha, xudduudaha iyo sharciyada, xataa kuwa khuseeya internetka.

## Talooyin ku saabsan sida carruurta loogala hadlo sawirrada qaawan

- Horay uga wadahadla oggolaanshaha dhanka internetka.
- Ka caawi ilmaha inuu fahmo waxa uu sharcigu oggol yahay iyo waxa uusan oggolayn ee ku saabsan sawirrada qaawan.
- U xaqiiji ilmaha inuu had iyo jeer kuula imaan karo wax kasta oo dhaca.
- Skuldbelägg aldrig barnet för att ha skickat nakenbilder.
- In carruurta loogu hanjabo in laga mamnuucayo telefoonka ama apps-ka, waxay keeni kartaa inay ka fogaadaan inay sheegaan marka ay wax xun dhacaan.
- Dacwad boolis u gudbi haddii ilmaha dambi laga galay – dambiyada ka dhaca internetka kama fududa dambiyada kale.

# Marka ay faafaan sawirro iyo muuqaallo qaawan

Ma garanaysaa ilmo sawirradiisa iyo muuqaalladiisa qaawan la faafinayo? Waa la joojin karaa faafinta sawirrada iyo muuqaalladaas. Ecpat waxay leedahay khad taageero oo aan carruurta iyo dhallinyarada kaga caawin karno in internetka laga saaro agabka xadgudubka ah, si looga hortago inay sii faafaan. Waxaan sidoo kale xiri karnaa akoonnada baraha bulshada. Ilmuhu wuxuu caawimo iyo taageero ka helayaa ‘Ditt Ecpat’ (Ecpatkaaga) – oo ah bog loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada.

Adiga oo qof weyn ah, waxaad Ecpat Hotline (Khadka Qaylodhaanta) u gudbin kartaa tuhunno ku saabsan xadgudubyada galmada ee ka dhanka ah carruurta. Waxay tusaale ahaan noqon karaan akoonno ‘expose’ ah, ‘grooming’ ama sawirro iyo muuqaallo qaawan oo internetka lagu faafinayo.

***Ku dhawaad saddex ka mid ah afartii carruurba, waxay heleen sawirro qaawan oo aysan codsan ama aysan rabin.***

Sahanka Ecpat ee ‘Nude på nätet’ (Qaawanaanta Internetka) 2023

**Khadka Qaylodhaanta Ecpat**

**Ecpatkaaga**

# Gargaarka koowaad

## haddii ilmo dhib loo geystay – ama haddii aad ka shakido in wax dhaceen.

### Baaqyo muujinaya dhibaatada
Fiiro u yeelo isbeddellada, sida hurdoxumada ama niyad-jabka. Waxay noqon karaan calaamado muujinaya in ilmaha dhib loo geystay, uuna dareen ahaan wanaagsanayn. Carruurtu waxay ka baqi karaan inaan la rumaysan, ama sida uu qofka weyni xaaladda uga falcelin doono. Sidaas darteed, waxay isku dayi karaan 'hadal-tijaabo', iyagoo sheekada ka dhigaya mid ku dhacday saaxiibkood ama wax ay maqleen. Noqo qof feejigan, iskana ilaali inaad wax eedeyso ama aad carooto.

### Ku dhiirro inaad weydiiso – is-deji oo dhegeyso
Xataa haddii aadan helin wax jawaab ah marka ugu horreysa ee aad wax weyddiiso, waxaad muujinaysaa inaad danaynayso iyo inay caadi tahay inuu wax kuu sheego. Muddo yar sug, ka dibna mar kale isku day xilli iyo jawi ka duwan kii hore. Dhallinyaro badan ayaa ka labalabeeya inay wax sheegaan, iyagoo ka baqaya inay qofka weyn niyad-jabiyaan ama ka caraysiiyaan. U oggolow ilmaha inuu hadalka dhammaystiro ka hor intaadan bilaabin inaad su'aalo weyddiiso, oo xushmee marka uusan ilmuhu rabin inuu hadlo.

### Booliska dacwad u gudbi haddii aad ka shakido in dambi dhacay
Carruurtu waxay inta badan dareemaan xishood iyo eed marka dhib loo geysto. Ka caawi ilmaha inuu fahmo in waxa dhacay aysan marnaba ahayn qaladkiisa.

### Polisanmäl om du misstänker brott
Booliska dacwad u gudbi haddii aad ka shakido in ilmo dambi loo geystay. Uma baahnid inaad hubaal u ogaato in waxa dhacay ay dambi yihiin; waa shaqada booliska inay baaritaan sameeyaan. Keydi caddaymaha sida wada-sheekeysiga (chats), magac-isticmaaleyaasha (usernames) ama sawirrada. Xusuusnow inay isku si u xun yihiin dambiyada internetka ka dhaca iyo kuwa nolosha caadiga ah.

### Gudbi warbixin walwal haddii aad ilmo u walwalsan tahay
Haddii aad ka shakido inuu ilmo dhibaato ku jiro, waa inaad had iyo goor gudbisaa warbixin walwal. Waa shaqada adeegga bulshada inay qiimeeyaan taageerada loo baahan yahay.

### Hubi inuu ilmuhu taageero helo
Carruurta dhibka loo geystay waxay xaq u leeyihiin taageero – mararka qaarkoodna waxaa sahlan in xaaladda lagala hadlo qof ka baxsan qoyska. Raadi caawimaad, tusaale ahaan adiga oo u maraya kuratoorka iskuulka ama xarunta dhallinyarada. Ilmuhuna wuxuu isaga oo aqoonsigiisa qariya geli karaa chatka **dittecpat.se.**

### Raadi taageero haddii aad u baahan tahay
In ilmo dhib loo geystay waxay kugu kicin kartaa dareenno badan oo xooggan, haddii aad qof weyn tahayna mar walba ma fududa inaad ogaato sida aad wax u maarayn lahayd. Raadi taageero haddii aad u baahan tahay, tusaale ahaan booqo: **ecpat.se/vuxenstod**.

# Sharcigu muxuu qabaa?

**Inaad adigu qof weyn ahaan la socoto waxa uu sharcigu qabo, waxay fure u tahay inaad barto ilmaha waxa bannaan iyo waxa aan bannaayn marka ay noqoto galmada, sawirrada qaawan, iyo oggolaanshaha, ha ahaato internetka gudihiisa ama nolosha caadiga ah.**

## Xudduudaha da'da

Qof kasta oo 18 jir ka yar waa ilmo, wuxuuna xaq u leeyahay in laga badbaadiyo xadgudubyada galmada. Ilmuhu markuu sii weynaadaba, waxaa sii kordhaysa xuquuqdiisa ah inuu isagu go'aan ka gaari karo noloshiisa. Laga bilaabo 15 jir, wuxuu ilmuhu iskiis u bixin karaa oggolaansho galmo. Sharcigu wuxuu guud ahaan qabaa inay dambi tahay in loo galmoodo ilmo 15 jir ka yar, iyada oo aan loo eegin inuu ilmuhu taas oggol yahay iyo in kale. Waxaa ka reebban oo kaliya haddii uu yar yahay farqiga u dhexeeya da'da kuwa isku galmoonaya, ayna caddahay in uusan falku xadgudub ahayn. Laga bilaabo 15 jir, ilmuhu wuxuu noqonayaa mid sharcigu qabanayo oo uu xukun ku dhici karo.

## Xadgudubyadu waxay ka dhacaan xataa internetka

Sharcigu ma kala saaro galmada fool-ka-foolka ah iyo tan ka dhacda internetka. Haddii qof uu ku qasbo ama ka dhaadhiciyo ilmo 15 jir ka yar inuu sameeyo fal galmo ah isaga oo adeegsanaya wada-sheekeysi muuqaal ah (videochat), ama marka uu ilmuhu muuqaal iska duubayo, taasi waa dambi galmo oo la mid ah sidii iyada oo ay hal meel ku wada sugnaan lahaayeen.

## Sharcigu wuxuu qorayaa sidan:

- In ilmo falal galmo loogu beddelo gunno mar walba waa dambi. Gunnadu khasab ma aha inay lacag kaliya noqoto, balse waxay tusaale ahaan noqon kartaa khamri, sigaar ama dhar summadaha qaaliga ah leh.
- Inuu ilmuhu sawirkiisa oo qaawan haysto dambi ma aha. Laakiin, in la haysto sawir qaawan ee ilmo kale oo aan weli baaluqin waa dambi. Xaaladaha qaarkood, waxaa xataa dambi noqon karta hadday sawirradu yihiin carruur baaluqay.
- In sawirro qaawan loo diro ilmo 15 jir ka yar guud ahaan waa dambi. Sidoo kale, waxaa dambi noqon kara in ilmo 15 jir ka yar sawir qaawan laga dalbado.
- Waa dambi in sawir qaawan loo diro qof 15 jir ka weyn oo aan sawirkaas doonayn. Sidoo kale, waa dambi in qof 15 jir ka weyn looga dalbado sawir qaawan hab sharafdhac ah.
- In la faafiyo sawir qaawan oo qof kale leeyahay waa dambi.
- In ilmo loogu hanjabo, lagu tashkiiliyo ama lagu dirqiyo fal galmo ah, mar walba waa sharcidarro.

## Marnaba ha ka labalabayn inaad dacwad soo gudbiso!

**Haddii ilmo loo geysto xadgudub galmo, waa arrin aad halis u ah – iyadoo ay isku mid tahay hadday ka dhacday internetka gudihiisa ama nolosha caadiga ah. Waa muhiim in dhacdada la baaro. Booliska dacwad u gudbi adigoo ka wacaya 114 14, ama waxaad tagi kartaa saldhig boolis. Haddii dambigu yahay mid markaas dhacaya, waa inaad mar walba 112 wacdaa.**

# Ecpat waxay u taagan tahay ka hortagga iyo joojinta xadgudubyada galmada ee ka dhanka ah carruurta

Khadkayaga taageerada iyo baaritaannada aan samaynno ayay carruurtu nala wadaagaan khibradahooda iyo dareenkooda. Taas waxaan ka helnaa aqoon gaar ah oo ku saabsan nolosha dhabta ah ee carruurta, waxayna naga caawisaa horumarinta habka aan u qaabbillo carruurta u baahan taageerada, iyo sida aan nolol-maalmeedkooda ugu taageerno waalidiinta iyo dadka kale ee waaweyn.

# Ecpat Vuxenstöd (Taageerada Dadka Waaweyn) – waxaa loogu talagalay adiga oo ah sokeeye carruur

Ecpat Vuxenstöd wuxuu u furan yahay adiga oo ah waalid ama qof kale oo weyn oo muhiim u ah carruur ku ag joogta. Halkan waxaad ka helaysaa macluumaad iyo latalin bilaash ah oo ku saabsan sida aad carruurta ugala hadli karto xadgudubyada galmada – ujeeddo ka hortag iyo marka ay wax dhacaan, labadaba.

Waxaad nagala soo xiriiri kartaa email ama waxaad qabsan kartaa ballan wadahadal telefoon

**Halkan ka akhriso wixii faahfaahin ah, ballanna ka qabso**

ecpat.se/vuxenstod